Taxanaha:
DHIGAALO DIINEED
7

WEYNAYNTA CILMIGA

Labaatan xeer

Dr. Saalax al-Cusaymi

Soo koobid iyo tarjumaad:

Aw Caddaani

WEYNAYNTA
CILMIGA

RUGTA WEGEN

TAXANAHA DHIGAALO DIINEED Q.1AAD

© Aw Caddaani

Nashqadeynta, qaabeynta jaldiga, tafatirka iyo quraaridda buugga:

Cabdirisaaq —Abu Cubeyda

@RugtaWegen

بسم الله الرحمن الرحيم

TUSMO

TUSMO 1
AFEEF 3
ERAYGA TURJUMAAGA 4
XEERKA 1AAD 9
XEERKA 2AAD 10
XEERKA 3AAD 11
XEERKA 4AAD 12
XEERKA 5AAD 13
XEERKA 6AAD 15
XEERKA 7AAD 17
XEERKA 8AAD 18

XEERKA 9AAD 19
XEERKA 10AAD............. 21
XEERKA 11AAD..............23
XEERKA 12AAD..............24
XEERKA 13AAD..............25
XEERKA 14AAD..............26
XEERKA 15AAD..............28
XEERKA 16AAD..............29
XEERKA 17AAD............. 31
XEERKA 18AAD..............33
XEERKA 19AAD..............35
XEERKA 20AAD 36

AFEEF

Waxa aan ka afeefanayaa oo ka cudurdaaranayaa, khalad kasta oo qoraal ama turjumaadeed oo ku yimaadda dhiganahan.

ERAYGA TURJUMAAGA

Amaan iyo mahad oo dhan waxay u sugnaadeen Allaah, Rabbiga Caalamiinta ah. Nabadgelyo iyo naxariisna ha ahaato Nebigeenna Muxammad ﷺ, ehelkiisa iyo asxaabtiisa dhammaantood.

«تعظيم العلم» — (Weyneynta Cilmiga) waa dhigane qiimo badan oo uu qoray Dr. Saalax ibnu Cabdillaahi al- Cusaymi.

Dhiganuhu wuxuu xambaarsan yahay, xeerar, tilmaamamooyin iyo

waanooyin muhiim ah oo la xidhiidha weyneynta cilmiga.

Sheekh Cabdikariim Xasan Xoosh, mar uu ka hadlayay dhiganahan, wuxuu ku tilmaamay, in uu yahay dhigane koobsanaya usluubkii cilmiga, waana dhigane si wacan loo hufay, carabidiisuna ay tahay mid aad u macaan.

Waxaan jeclaystay in aan kitaabkan u soo gudbiyo akhristayaasha af-Soomaaliga ku hadla, si ay uga

faa'iidaystaan murtida iyo faa'iidooyinka ku jira.

Sidaas darteed, waxaan cinwaannada kitaabka u turjumay af-Soomaali, halka hadallada iyo sharaxaadaha uu Sheekhu ku soo bandhigay casharrada, aan ka soo qaatay nuxurkooda iyo macnaha guud, anigoo ku dadaalay in aan akhristaha u soo gudbiyo ujeeddada hadalka iyo faa'iidada laga leeyahay.

Sidaas darteed, qoraalkan looma jeedo in uu yahay turjumaad eray-eray ah oo

dhammaan hadallada sheekha ah, balse waa soo gudbin macne iyo nuxur, si ay ugu sahlanaato akhristaha Soomaaliga ahi in uu fahmo mawduuca, una dhadhansado faa'iidooyinka cilmiga ee qoraalku xambaarsan yahay.

Waxaan Alle ka baryayaa in uu shaqadan ka dhigo mid anfacda qofkii akhriya, kana dhigo sabab lagu weyneeyo cilmiga, lagu jeclaado, laguna dhaqmo. Waxaan sidoo kale ka baryayaa in uu qoraaga kitaabka ku abaalmariyo khayrka uu ummadda u soo gudbiyay,

anagana naga aqbalo dadaalka yar ee aan ku bixinnay soo gudbintiisa.

XEERKA 1AAD

NADIIFIN

Qofkii doonaya in uu hanto cilmiga, ha hagaajiyo gudaha naftiisa, hana ka **nadiifiyo** qalbigiisa wasakhda danbiyada. Cilmigu waa luul qaali ah; mana ku habboona in uu dego qalbi aan nadiif ahayn.

XEERKA 2AAD

DAACADNIMO

Daacadnimada, waa saldhigga lagu aqbalo camalka, waana jidka lagu gaadho himilooyinka. Dadkii wanaagsanaa ee inaga horreeyey, waxay kaga hormareen dadka kale, kuna gaadheen darajooyin sare, daacadnimada ay Alle u daacadda noqdeen.

XEERKA 3AAD

YOOL

Qofkii doonaya in uu himmadiisa oo dhan is kugu geeyo barashada cilmiga, ha ku deddaalo cilmiga, Alle-na ha u kaashado, raadintiisana yaanu ka caajisin; waayo markaas ayuu gaadhi doonaa **yoolkiisa**, kuna guulaysan doonaa wixii uu rajaynayay.

XEERKA 4AAD

QUR'AANKA IYO SUNNADA

Cilmi kasta oo dheef leh , wuxuu salka ku hayaa **Qur'aanka** iyo **Sunnada** Suubanaha ﷺ . Culuumta kale waxay noqon karaan kuwo u adeega Qur'aanka iyo Sunnada iyo kuwo aan xidhiidh lalahayn. Kuwa u adeegaya waxa laga qaataa inta adeegoodu ku jiro, kuwa aan xidhiidhka la lahaynna aqoon la'aanteedu, wax dhib ah ma laha.

XEERKA 5AAD

DHABO

Dhabada cilmiga iyo jidkiisu, waxay ku dhisan yihiin laba arrimood:

Arrinka **1aad**: in uu korka ka qabto matni dhamaystiran oo ka mida mutuunta culimada fannigaasi ay ku tiirsan yihiin.

Arrinka **2aad**: waa in uu u go'aa macallin uu ka fahmo macnayaasha

cilmiga, kaas oo leh labadan sifo:

1. Wax tar iyo faa’ido gelin.
2. Talo iyo waanno

XEERKA 6AAD

ILAALIN IYO KALA HORMARIN

Ilaalinta qaybaha cilmiga iyo kala **hormarintoodu**, waxay ku dhisan yihiin laba arimood:

1. In mudnaanta la siiyo waxa ugu muhiimsan, gaar ahaan cilmiga uu ardaygu u baahan yahay si uu u hagaajiyo cibaadada Alle.

2. In bilawga lagu qaato cilmi walba aasaaskiisa oo kooban, kadibna culuumta

wax tarka u leh uu ku sii qoto dheeraado.

XEERKA 7AAD

DEGDEGID

Cimrigu waa sida ubaxa; haddii lagu hago jidka wanaagga iyo himilooyinka sare, way midho dhashaa, haddii Kalena way engegtaa. Waxyaabaha ka dhiga mid midho dhala, waa in loo **degdego** cilmiga, lagana tago caajiska iyo tabar-darrida, lagana faa'iidaysto da'da dhallin yarnimada.

XEERKA 8AAD

UKAADIN

Helitaanka cilmigu hal mar ma wada aha; waayo qalbigu ma qaadi karo. Sidaas darteed, u **kaadinta**, dulqaadka iyo tartiib u socodka cilmiga, waxaa ka mid ah, in lagu bilaabo kutubta kooban (mutuunta) ee laga qoray qaybaha kala duwan ee cilmiga, iyada oo la xifidinayo lana fahmayo, lagana fogaanayo akhrinta kutubta waaweyn ee faahfaahsan ee ardaygu weli aanu heerkeeda gaadhin.

XEERKA 9AAD

ADKEYSI

Adkeysiga cilmigu wuxuu u qaybsamaa laba nooc:

1. **U adkeysiga barashadiisa iyo qaadashadiisa:**
   Waxa ka mid ah in loo adkeysto xifdintiisa, fahamkiisa, ka qaybgalka fadhiyada cilmiga iyo ilaalinta xuquuqda macallinka.

2. U adkeysiga gudbintiisa iyo faafintiisa:
Waxa ka mid ah in loo adkeysto

wax baridda ardayda oo si wanaagsan wax loo fahansiiyo, iyo in loo dulqaato qalalaadkooda iyo gaabiskooda.

XEERKA 10AAD

ANSHAX

Qofka dhaqankiisa wanaagsani waa astaanta farxaddiisa iyo guushiisa, halka dhaqan xumiduna ay tahay astaanta hooggiisa iyo khasaarahiisa. Ma jiro wax lagu kasbado khayr adduun iyo aakhiraba oo la mid ah dhaqanka wanaagsan, mana jirto wax keena in la seego khayr adduun iyo aakhiraba oo la mid ah **anshax**-xumida. Qofku wuu u qalmaa cilmiga haddii uu wanaajiyo dhaqanka naftiisa, waxbarashadiisa, la

macaamilka macallinkiisa iyo saaxiibadiisa waxbarashada.

XEERKA 11AAD

DHAWRID

sharafta iyo usluub wanaaggu waxay ku dhisan yihiin laba arrimood: in la sameeyo waxa qofka qurxiya ee sharaf u kordhiya, iyo in laga **dhawro** waxa ceebeenaya ee sumcaddiisa dhaawacaya. Qofkii dayaca dadnimaddiisa isaga oo ku abtirsanaya cilmiga, wuxuu ku ceeboobaa aqoon leyda iyo kuwa caammada ah, mana helo sharafta cilmiga.

XEERKA 12AAD

SAAXIIB WANAAGSAN

Yeelashada **saaxiib** ama wehel waa baahi dabiici ah. Ardayga cilmiga raadinayaana, wuxuu u baahan yahay in uu la saaxiibo arday kale si ay is kugu kaalmeeyaan barashada cilmiga iyo ku dadaalka raadintiisa.

XEERKA 13AAD

DADAAL

Xifdintu waa **dadaal** uu qofku kaligiis la galo naftiisa. Muraajacaduna waa wada-fadhi iyo is-weydaarsi lala yeesho saaxiibka waxbarashada. Su'aashuna waa u noqoshada iyo ka faa'iidaysiga culimada.

XEERKA 14AAD

GEFKA CULIMADA

Waxyaabaha ku habboon in halkan lagu xuso waxaa ka mid ah, waajibka loo baahanyahay marka caalim uu ka dhaco **gef** ama qalad. Waajibkaas wuxuu ka kooban yahay lix arrimood:

1. In la hubsado in uu gefkaasi dhab ahaan ka soo baxay caalimka.

2. In la xaqiijiyo in waxa uu sheegay runtii qalad yihiin; arrintanna waxaa u taagan culimada ku xeeldheer cilmiga.

3. In aan lagu

raacin qaladkaas.
4. In loo raadiyo cudurdaar sax ah haddii uu jiro fasiraad ama ijtihad la aqbali karo.
5. In si tartiib iyo qarsoodi ah loogu nasteexeeyo ee aan lagu ceebayn dadka hortooda.
6. In la ilaaliyo sharaftiisa iyo karaamadiisa, si aan hal qalad dartii loogu lumin maamuuskiisa.

XEERKA 15AAD

MUGDI

Arrimaha adag, **mugdiguna** ku jiro ee cilmiga ah waxaa ka mid ah: in qalalaadka ay culimadu galaan iyo hadallada aan saxda ahayn ee ay sheegaan dadka xaqa ka leexday loo celiyo culimada aqoonta dheer u leh; waayo arrimaha noocaas ah kama hadli karaan cid kasta ee waxaa u qalma oo keliya culimada ku xeel dheer cilmiga.

XEERKA 16AAD

XURMEYN

Ardayga cilmiga baranayaa waa in uu ogaadaa in golayaasha cilmigu leeyihiin xuquuq iyo **xurmo** goonni ah. Waa in uu fadhiistaa fadhi edeb leh, dhageystaana sheekhiisa isaga oo eegaya oo u fiirsanaya hadalkiisa.

Waxa kale oo ka mid ah xurmeynta golayaasha cilmiga: **in la maamuuso weelasha lagu kaydiyo cilmiga**, kuwaas oo ah **kutubta**.

Waxa u habboon ardayga cilmiga baranaya: in uu dhowro kitaabkiisa, ilaaliyo oo xurmeeyo, si wanaagsana u daryeelo.

XEERKA 17AAD

DIFAAC

Cilmigu waxa uu leeyahay xurmo weyn oo ballaadhan, taas oo waajib ka dhigaysa in loo hiiliyo oo la **difaaco** kolka lagu xadgudbo. Difaacaas iyo garab istaagga cilmiga waxa ay culimadu ku muujiyeen arrimo ay ka mid yihiin:

- **In loo jawaabo qofka qaldama**, iyada oo la ilaalinayo edebta iyo akhlaaqda, lagana fogaanayo dulmiga iyo xadgudubka.

- **In laga fogaado qofka bidcoolaha ah** (haddii ay jirto maslaxad iyo sabab ku habboon).
- **In la canaanto ama la eryo**, marka ay ka muuqato edeb-darro iyo ixtiraam la'aani.

XEERKA 18AAD

HUBSIIMO

Qofku kuma guulaysan karo taxadarka iyo **hubsiimada** kolka wax la waydiinayo culimada, ilaa uu ku dhaqmo afar asal:

1. In uu ka fikiro weydiintiisa: *Maxay tahay sababta uu u weydiinayo?* Waa in uu ujeeddadiisu noqotaa faham, barasho iyo kororsi cilmi.

2. In uu fiiro gaar ah u yeesho waxa uu waydiinayo. Waa in uusan waydiin wax aan

faa'iido lahayn ama aan wax tar u lahayn.

3. In uu ogaado xaaladda ku habboon ee shiikha si uu uga jawaabo su'aasha. Waa in aanu weydiin xilli aanu shiikhu diyaar u ahayn, sida marka uu mashquulsan yahay, murugaysan yahay, fikir ku jiro ama uu jid ku socdo.

4. In uu ka fiirsado sida uu u weydiinayo su'aalaha. Waa in uu su'aasha u dhigaa si edeb leh, cad oo habboon.

XEERKA 19AAD

DHADHAN

Dhadhanka cilmiga waxaa lagu helaa saddex arrimood:

1. In la bixiyo dadaal iyo juhdi badan.
2. Run ka ahaanshaha raadinta cilmiga.
3. Saxanaanta niyadda iyo ikhlaaska.

XEERKA 20AAD

WAQTIGA

Haddii cilmigu yahay waxa ugu sharafta badan ee la doonayo, cimriguna uu u socdo sida baraf dhalaalaya oo kale, markaas, caqliga iyo garashadu waxay ina farayaan in **waqtiga** lagu ilaaliyo cilmiga, lagana baqo in lagu lumiyo wax aan faa'iido lahayn. Su'aasha nala weydiin doono

maalinta Qiyaamaha ee ku saabsan waqtigeenna ayaa igu dhiirrigelinaysa aniga iyo adigaba inayno si aad ah uga taxaddarno ilaalintiisa iyo ka faa'iidaysigiisa.